



DIYAAR GAROW, MINNESOTA

KU-JOOG BEDQAB MN

Barnaamijka Talaalka Bulshada ee Minnesota

Tallalka COVID-19 oo lacag la'aan ah

Children's[®]
MINNESOTA

The Kid Experts[™]

Waqtiga la heli karo ballanta tallalka:

05/10/2022 – 06/30/2022

Goobaha iyo waqtiyada tallalka:

West St. Paul Clinic – Tuesdays, 5:30 to 7:30 p.m.

Brooklyn Park Clinic – Thursdays, 5:30 to 7:30 p.m.

St. Paul Clinic – Saturdays: 5/14, 5/28, 6/11, 6/25, 9 a.m. to 3 p.m.

Minneapolis Clinic – Saturdays: 5/21, 6/4, 6/18, 9 a.m. to 3 p.m.

Nooca tallalka: Pfizer

Pfizer qiyaasta koowaad iyo labaad: Waa inaad tahayshan jir ama ka weyn
Qiyaasta xoojinta Pfizer: Waa inaad jirtaa lix iyo toban sano ama ka weyn

*Waalidiintu waa inay oggolaansho bixiyaan dhammaan carrurta aan qaangaarin. Waxaa laga rabaa waalidka in uu joogo goobta tallalka marka caruurta da'doodu u dhaxayso 5-15 jir la tallaalayo.

Sida aad iskugu diwaangelin lahayd ballanta:

- Hadda ballan waxaa loo qabsan karaa qaybta kowaad ee tallaalka tariikhda kor ku qoran. Si aad u samaysato ballan, isticmaal boggan internka : https://my.primary.health/r/childrens-mn?registration_type=default
- Sawir ama Iskaan ka qaad koodhka hoos ku yaala



Waxa aad u baahan tahay si aad balan u qabsato:

- Waxaad u baahan tahay oo kali ah inaad bixiso magacaaga koowaad, magaca awoowga, taariikhda dhalashada iyo cinwaanka guriga.
- Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad bixiso taleefon lambarkaaga iyo cinwaankaaga iimayl, haddii aad leedahay.
- Haddii aadan horay ballan u qabsan, waa lagu qaabilayaa haddii aad imaatid.

Waxad u baahan tahay maalinta ballantaada:

- Waxaa lagaaga baahan yahay inaad Maaskaro xirato oo aad u hoggaansato shuruudaha kala fogaanshaha dadka.
- Waxaad u baahan tahay inaad xaqiijiso magacaaga koowaad, magaca awoowga, taariikhda dhalashada iyo cinwaanka guriga.
- Uma BAAHNID inaad sharci la timaado.
- Uma BAAHNID ceymiska caafimaad.
- Turjumaada luuqadaha iyo American Sign Language (ASL) (Luuqadda Dhagoolka ee Mareykanka) ayaa goobta laga heli doonaa.
- Fududeynta ADA (Sharciiga Naafada Mareykanka) ayaa goobta laga heli doonaa.

Gaadiidka dadweynaha:

- Qorsheeyaha Socodka Gaadiidka Basaska: [Qorsheeyaha Socodka – Gaadiidka Basaska \(Trip Planner - Metro Transit\)](#).
- Macaamiisha Metro Mobility (Gaadiid Raaca La Wadaago) ee sharciyeysan ayaa wacan kara bixiyeyaasha gaadiid raaca si ay uga qabsadaan balanta safaradooda 651-602-1111 (TTY 651-221-9886).



Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975



The Kid Experts™